# Taageeradeyda Dhaqaala

Adeegu waa mid shakhsi ahaaneed kaas oo lagala xidhiidhayo xafiiska samo falka bulshada ee la xid-hiidha taageerada dhaqaalaha iyo cidii doonaysa inay kiiskeeda online ahaan kula socoto. Waa inaad haysataa BankID si aad u isticmaali karto adeega. Waa inaad sidoo kale ka dalbataa sarkaalka samo falka bulshada ama maamulaha dhaqaalaha in lagaaga shaqaysiiyo adeega.

---

Gal Mitt försörjningsstöd, adiga oo qabanaya www.lund.se kadibna dooro Självservice – Våra mest använda tjänster – Kolla status för ditt för-sörjningsstöd (Shaqaysiga nafta/Adeegaayada ugu caansan/Eegida xaaladaada taageerada dhaqaale).

Marka aad riixdo linkiga adeega elektorooniga ah, waxaa lagu gayn doonaa qeybtaan hoos ka muuqato. Xulo hadii aad doonayso inaad gasho adiga oo isticmaalaya BankID deegaanka [lokalt] ama BankID moobilka [mobilt Bank-ID].




Waxaad gelisaa lambarka aqoonsigaaga shakhsi ahaaneed (12 lambar) oo riix Gå vidare (soco) ama Tab iyo Enter.




Cadeey aqoonsigaaga Dawlada Hoose ee Lund adiga oo gelinaya koodhkaaga amaanka.



Halkan, waxaad raaci kartaa nidaamka arjigaaga oo eeg wixii bixino ah.

Hadii ay jiraan bixino, taas waxa lagu arki doonaa boga hore ee taariikhda bixinta lacagta, xadiga iyo cida la siinayo. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixinaya, riix dusheea.

U fiirso in taariikhda bixinta looga jeedo taariikhda lacagta laga dirayo Adeegyada Bulshada. Lacagtu waxay ka muuqan doontaa akownka 1-2 maalmood oo shaqo kadib.




Riix Ansökningar (Arjiyada) si aad u raacdo nidaamka arjiga, sida, duwaan galinta, xisaabinta, go'aanka iyo bixinta.

Arjigu waxa uu yeelan karaa xaalada Registrerad (Duwaan gashan), Beslutad (La Go'aamiyay) ama Utbetalad (La bixiyay).



Riix arjiga si aad u aragto linkiga xisaabinta, go’aanka iyo bixinta ee arjigaas gaarka ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah, waa inaad riixdaa linkiga buluuga ah ee Beräkning (Xisaabinta), Beslut (Go’aanka) ama Utbetalning (Bixinta).

**Waxaa gaar ahaan muhiim ah in la akhriyo macluumaadka ku hoos yaal Beslut (Go’aanka), maadaama oo laga yaabo inay ku jiraan macluumaad muhiim ah oo la xidhiidha arjigagaagu.**







Si aad u qoraalada ama fariimaha, riix sanduuqa Dokument (Waraaqaha).

Waxaa kadibna soo baxaya taariikhda waraaqaha iyo cinwaankooda. Si aad u akhrido, riix waraaqaha. Ogosoonaw in qaybtan aan lagu wada arkaynin dhamaan duwaanada oo dhan.






Qaybta Kontakter (Xidhiidhka), waxaad ku arkaysaa macluumaadka sarkaalka samo falka bulshada iyo maamulaha dhaqaalaha ee adiga kugu qorayn. Lambarka telefoonka iyo saacadaha lala hadli karo way ku qoran yihiin.




Macluumaadka lagaala soo xidhiidhayo waxay ku yaalaan qaybta sare ee magacaaga hoosteeda iyo Min profil (Macluumaadkayga). Waxaad ka badali kartaa telefoon lambarkaaga iyo iimeelkaaga halkan.




Waxaad ka logga ut (bixi kartaa) adiga oo adeegsanaya isku muujin xaga sare ee shaashada ah. Kadibna xidh daaqada internetka.

## Hadii uu kuu shaqayn waayo adeegu

### Hadii uu kuu shaqayn waayo BankID gaagi

La xidhiidh baanga bixiyay aqoonsiga elektorooniga ah.

Fadlan sidoo kale macluumaadka ka eeg www.e-legitimation.se.

### Hadii aanu shaqaynaynin internetkaagu

Isku day inaad gadho websayt kale. Hadii uu kuu geli waayo, la xidhidh shirkada internetka kuugu jira.

### Hagaajinta adeega

Khamiiska ugu horeysa ee bil kasta, adeega waa la xidhaa si looga shaqeeyo inta u dhaxaysa 12:00 iyo 14:00. Lama geli karo mudadaas inta u dhaxaysa.

### Mushkiladaha kale ee gelida

Hadii ay kusoo gaadho fariinta “Ett fel har uppstått, kontakta systemadministratör” (khalad baa dhacay. Fadlan la xidhiidh maamulada nidaamka.), xidh daaqadaada, oo sug dhawr daqiiqadoo, oo kadibna isku day. U sheeg sarkaalkaaga samo falka bulshada ama maamulaha shaqaalaha hadii aad geli kari waydo.

LUNDS KOMMUN